

COVID-19: Hagaha loogu talogalay Degganayaasha Toronto

Hagahan wuxuu dadka reer Toronto siinaya macluumaad ku saabsan qaar ka mid ah waxa looga baahan yahay Gobolka Ontario ee tallaabooyinka xiritaanka iyo amarka Joogitaanka-Guriga ee gobolka ee COVID-19 laga bilaabo Khamiista, Abril 8 ee Toronto.

Hagahan maaha talo sharci laakiin jabinta qaar ka mid ah tilmaamahan waxay abuuri doonaan dembiyo sida ku xusan xeerarka gobolka. Si loo hubiyo u hoggaansanaanta dhammaan xeerarka gobolka ee la dabaqi karo, shakhsiyadka iyo ganacsatada waa inay la tashadaan sharciyada la xiriira, oo ay ku jiraan [qodobbada Aagga Xiritaanka, Amarka Joog-Guriga](#) iyo/ama inay helaan talo sharci. Soo koobitaanka goboleed ee [xayiraadda COVID-19: taallaabooyinka badqabka goobta shaqada iyo caafimaadka dadweynaha ee kor loo qaaday](#) ayaa laga heli karaa websaydka Gobolka.

Sharciga maaskarada, iyo sharciga kala fogaanshaha jireed ee magaalada ee jardiinooyinka iyo fagaarayaasha aaya weli sii jiraya waana in la raaco. Waa muhiim in la raaco tallaabooyinka caafimaadka bulshada si [loo yareeyo faafitaanka fayraska](#). Wac Khadka degdegga ah ee Caafimaadka Dadweynaha Toronto 416-338-7600 haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid COVID-19.

Waad ku mahadsantahay kaalintii aad ka qaadatay sidii loo joojin lahaa faafitaanka COVID-19 ee Toronto.

Aagga Xayiraadda iyo Amarka Joog Guriga	
Isu imaatinada gudaha	<p>Waa in aad sii joogo meesha aad hadda ku noosahay waqtiyada oo dhan haddii uusan tegitaanku lagama maarmaan u ahayn mid ka mid ah sababaha uu oggol yahay amarka Joog-Guriga. Waad isticmaali kartaa qeybaha bannaanka ee gurigaaga sida daaraddaada ama meelaha la wadaago ee gudaha ee furan, oo ay ku jiraan luuqyada daaradda halkaas oo ku samaynayo kala-fogaanshaha iyo xirashada maaskaro.</p> <p>Munaasibadaha dadweynaha ee abaabulan iyo isu imaatinka bulshada ee gudaha lama oggola, marka laga reebo xubnaha isku qoyska ah iyo qofka keligiis nool.</p> <p>Haddii aad keligaa noosahay, waa inaad xiriir dhow la leedahay kaliya hal guri oo kale.</p>
Isu imaatinada bannaanka	Munaasibadaha dadweynaha ee abaabulan iyo isu imaatinnada bulshada lama oggola, marka laga reebo xubnaha isku qoyska ah iyo qofka keligiis nool.

Last updated: Abril 20, 2021

Aagga Xayiraadda iyo Amarka Joog Guriga	
Dugsiyada	Way ku qasban yihiin marka laga reebo ka reebitaano xaddidan, dugsiyada, ku jira <i>Sharciga Waxbarasho</i> , way sii xirnaanayaan.
U safridda gobolo kale	Waa inaadan u safrin meel ka baxsan deegaankaaga ama gobolkaaga haddii aysan si dhab ah lagama maarmaan u ahayn.
Adeegyada diinta: Aroosyada & Aaaska	<p>Adeegyada diimeed ee gudaha iyo bannaanka ee leh ujeedooyin aroos, aas ama adeeg diimeed, dhaqan ama xaflad waxay ku kooban yihiin 10 qof ama wax ka yar.</p> <p>Kulamada bulshada ee gudaha ee la xiriira ama la socda wixii ah aroos, aas, ama adeeg diineed, dhaqan, ama xaflad lama ogola.</p>
Tafaariiqda	<p>Inta badan dukaamada tafaariiqda ayaa u xiran dukaamaysiga gudaha. Qaadista iyo keenida alaabada horay loo dalbaday waxaa loo ogolyahay balan hore kahor inta udhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 8-da fiidnimo. Dhammaan iibka waa in loo sameeyaa qaab aan u baahneyn macaamilka inuu soo galoo dukaanka. Gaarsiinta waa la ogolyahay inta udhaxeysa 6-da subaxnimo ilaa 9-ka fiidnimo.</p> <p>Dukaamaysiga gudaha dukaanka waa la ogolyahay iyadoo lagu xaddiday qaadka 25%:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Farmasiyada • Dukaamada sida asalka ah iibiya raashinka (dukaamada waaweyn, dukaamda ku habboon, suuqyada beerayada ee gudaha) • Dukaamada qimo dhimista iyo sanaadiiqda waaweyn ee keliya loo oggol yahay iibinta waxyaabo xaddidan, oo ay ku jiraan raashinka, agabka daryeelka xayawaanka, nadaafadda guriga iyo agabyada daryeelka caafimaadka. • Dukaamada iibiya khamriga (biirka, weeyinka iyo spirits) • Xarumaha beeraha bannaanka iyo bacrimiyayaasha dhirta • Guryaha cagaaran ee gudaha. <p>Suuqyada bannaanka waa la oggol yahay haddii:</p> <ul style="list-style-type: none"> • ay ugu horreyn iibiyaan cunto

Last updated: Abril 20, 2021

Aagga Xayiraadda iyo Amarka Joog Guriga	
	<ul style="list-style-type: none"> Alaabada loo siiyo macaamiisha qaab u oggolaanaya macmiilka inuu ku eekaado aagga bannaanka markasta ama qaadista iyo keenista qarka wadada iyo Qaad aan ka badnayn 25% <p>Keliya ballan, ku dukaamaysiga gudaha dukaanka ayaa la oggol yahay iyadoo ku qasban xaddidaadka qaadka ee ah 25%:</p> <ul style="list-style-type: none"> Dukaamada agabka amniga Ganacsiyada asal ahaan iibiya, kireeya, ama dayactira aaladaha, taageerayaasha ama agabyada caawinta, socodka, ama caafimaadka, Dukaamada indhaha ee iibiya muraayadaha dhakhtarku qoro Dukaamada taafaariiqda ee Bixiya isgaarsiinta <p>Shakhsiyadka waxay geli karaan oo keliya xarumaha ganacsiga si ay u helaan ganaci loo oggol yahay inuu u furnaado marka loo eego sharciga gobolka , oo ay ku jiraan farmasiyada ama dukaamada inta badan iibiya cuntada iyada oo loo eegayo xaddidaadyada qaadka, ama ballanta qaadista jadwalka leh ee loogu talogalay hal meel in loo qaado.</p> <p>Dukaamada loo oggol yahay inay furnaadaan waa inay lahaadaan calaamado la soo dhajiyay oo uga baahan macaamiisha inay iskood isku baaraan. Haddii aadan soo marin isbaaritaanka, waa inaadan soo gelin.</p> <p>Marka laga reebo kuwa aad u xaddidan dadka qaba xaaladaha caafimaad ama carruurta aadka u yar, dhammaan dadka dukaamada ku jira waa inay xirtaan maaskaro ama daboolka wejiga.</p>
Makhaayadaha	<p>Qaadashada, usii marinta iyo keenista ayaa la oggol yahay, oo uu ku jiro Khamrigu.</p> <p>Ku cashaynta gudaha ama bannaanka lama oggola.</p>
Adeegyada daryeelka shaqsiyed	<p>Adeegyada daryeelka shaqsiyed sida meelaha lagu qurxiyo timaha, timojareyaasha, meelaha lagu qurxiyo cidiyaha, istuudiyyaha maqaarka, meelaha taatuuga iyo adeegyada kale ee la isku qurxiyo looma oggola inay shaqeeyaan.</p>

Last updated: Abril 20, 2021

Aagga Xayiraadda iyo Amarka Joog Guriga	
	<p>Ballamada daryeelka caafimaadka ee leh xirfadlayaal caafimaad oo nidaamsan ee loogu talogalay adeegyada sida jimicsiga jirka iyo daaweynta duugista ayaa la oggol yahay.</p>
	<p>Qaar ka mid ah goobaha maddadaalada ee bannaanka way furan yihiin, iyadoo ay ku xiran tahay shuruudo. Isticmaalka maaskaro ama daboolada wajiga ayaa aad loogu talinaya marka la isticmaalayo goobaha sii furnaanaya ama xaaladaha ay adag tahay kala-fogaanshaha bulshadu. Maaskarooyinka waa in la xidho inta la isticmaalayo musqulaha iyo marka lagu jiro safafka.</p> <p>Goobaha furan:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Baararka iyo xeebaha • Garoomada ciyaarta • Xamaamyada • Meelaha eyga lagu sii daayo • Kuraasta jardiinooyinka ama goobaha maddadaalada • Goobaha bulshada iyo barxadaha
Maddadaalada	<p>Dhammaan goobaha kale ee bannaanka ee aan kor ku xusnayn, way xiran yihiin marka loo eego xeerarka gobolka, oo ay ku jiraan:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Miisaska iyo hoy'ada biknik • Koorsooyinka golofka • Koorsooyinka golofka miiska • Goobaha iyo fagaarayaasha ciyaaraha (i.e. kolayga iyo garoomada teniska, goobaha kubadda cagta, dheemanada beesbool, cawska cagaaran ee bawlinka) • BMX iyo jardiinooyinka iskeetka • Qalabka jimicsiga ee bannaanka • Suufafka qalalan (sida kuwa inta badan la isticmaalo goobaha isbortiga) <p>Fasallada jimicsiga bannaanka iyo tababarada lama oggola.</p> <p>Ciyaaraha gudaha iyo xarumaha jimicsiga maddadaalada way xiran yihiin, iyagoo leh ka reebitaano xaddidan (tusaale, isticmaalka xirfadlayasha iyo</p>

Last updated: Abril 20, 2021

Aagga Xayiraadda iyo Amarka Joog Guriga	
	ciyaaryahanada xirfadda sare leh, helitaanka daaweyn jireed ee shaqsiyaadka naafada ah sida ku xusan (<i>Sharciga Naafada ee Helitaanka Dadka Ontaariyo</i>)
Maktabadaha	maktabaduhu way furan yihii laakiin isticmaalku wuxuu ku kooban yahay soo-qaadasho aan taabasho lahayn. Buugaagta iyo waxyaabaha kale ee wareegaya waa in lagu bixiyaa taleefanka ama onlayn si aad u soo qaadato.
Daryeelka xayawaanka	Adeegyada dhakhtarka xayawaanka waa la oggol yahay. Adeegyada xayawaanka sida adeegsiga fadhiga xayawaanka, adeegyada socodka xayawaanka, adeegyada qurxinta iyo adeegyada tababbarida xayawaanka waa la oggol yahay.
Adeegyada guriga	Adeegyada guriga iyo nadaafadda iyo dayactirka ee taageera carruurta, waayeelka iyo kuwa jirran waa la oggol yahay.